



# Kudka (Anthrax)

## Waa maxay kudku?

Cudku waa cudur ay bakteeriya keento oo badanaa ku dhaca xayawaanka sida lo'da, doofaarka, adhiga iyo ri'yaha. Bakteeriyada kudku waxay sameysataa unugyo abuur ah oo ku noolaan kara deegaanka mudo dheer. Waa dhif in kudku ku dhaco bini'aadanka laakiin marka uu ku dhaco waxay ka qaadeen taabashada xayawaan cudurka qabay ama alaabo kale oo lahayd unugyada abuurka ee kudka, cunista hilib leh cudurka ama neefsashada abuurka ee kudka. Qofku kudka ma qaadiin karo qofka kale.

## Noocyada kudka iyo astaamaha

Waxa jira saddex nooc oo ah kud waxana aya astaamaha lagu yaqaana u kala duwan yihiin sida cudurka loo qaaday. Astaamuhu waxay badanaa yimaadaan gudaha hal ilaa todoba maalmood ka dib soo gaadhista cudurka, laakiin waxay qaadan karaan ilaa 60 maalmood. Noocyada kudka iyo astaamahoodu waa:

- **Kudka neefsashada (inhalational anthrax)** — Nooca ugu daran kudka; waxa sababa unugyo abuurka ah ee kudka oo marka hawada la neefsado ama jiido gala sambabada. Astaamihiisa ugu horeeya waxa laga yaabaa inay u ekaadaan kuwa infiluwensaha ama hargabka caadiga ah: qandho, qufac, madax-xanuun, qadhqadhyo, tabar-dari, neefsashada oo dhib ah iyo raaxo-daro ah laabta. Ka dib dhawr maalmood, waxa laga yaabaa in astaamuhu isu beddelaan dhibaatooyin neefsasho oo daran iyo shoog qofka ku dhaca. Noocan cudurka kudka badanaa waa loo dhintaa haddii aan dhakhso loo daweyn. Marka uu jiro faafin kas ah, sida marka uu dhaco fal argagixiso oo biyoolooji ah, abuurka kudka oo la neefsado ayaa ah habka soo-gaadhista ee ugu suurto galsan.
- **Kudka maqaarka (cutaneous anthrax)** — waxa uu yimaadaa marka bakteeriyada kudku taabato maqaar jeexan ama dhaawacan. Astaamaha ugu horeeya waxa ka mid ah meel buuran oo cuncun leh. Astaamaha goor dambe la arko waxa ka mid ah fin biyo leh oo yar, oo isu beddela nabar aan xanuun lahayn oo leh dhex madow. Waxa kale oo laga yaabaa in qanjidhada limfiga (lymph glands) ee meelaha waxyeeloobay iyana bararaan.

## ■ Kudka caloosha iyo xiidmaha

**(gastrointestinal anthrax)** — waxa keena bakteeriyada kudka oo la liqo. Waxa uu dhaawac u geystaa xiidmaha. Astaamaha ugu horeeya waxa ka mid ah lallabo ama yalaalugo, matag, rabitaanka cuntada oo luma, iyo qandho, uu ku xigo xanuun ubucda ah, matagid dhiig, iyo shuban daran.

## Garashada soo-gaadhista kudka ee suurto galka ah

- Haddii aad leedahay astaamaha lagu yaqaan kudka, la tasho bixiye daryeel caafimaad. Haddii aad rumeysan tahay in si kas ah lagu soo gaadhsiiyay kud, waa inaad isla markiiba la xidhiidhid saraakiisha fulinta sharciga.
- Haddii aad heshid warqad ama xidhmo/baako laga yaabo in kud ku jiro:
  - Si tartiib ah xidhmada u dhig dhulka oo iska daa ama ha farofareyn si aan abuurka kudku hawada ugu fidin.
  - Isla markiiba gacmahaaga si dhammeystiran ugu dhaq saabuun iyo biyo diiran.
  - Wac 9-1-1 si aad u soo sheegtid dhacdada. Raac fariimaha shaqaalaha 9-1-1 ilaa gargaar ku soo gaadho.
  - Xusuuso: Ha sii taaban ama ha farofareyn xidhmada ama baakada iyada oo taasi lagama-maarman tahay mooyaane.

## Daweynta kudka

- Waa in antibiyootiko la isticmaalo si looga hortago ama loo daweyo kudka kaliya iyada oo uu maareynayo bixiyahaaga daryeel caafimaad ama waaxda caafimaadka ee degmada. Waxa loo baahan yahay in isla markiiba la daweyo dhammaan noocyada cudurka. Maadaama aan kudka qofku qaadiin qof kale, ma jirto baahi loo qabo in la tallaal ama la daweyo dadka xidhiidh la yeeshay dadka la jiran kudka, sida xubnaha qoyska, saaxiibo, ama shaqaale ay meel ka wada shaqeynayaan, iyada oo iyagana uu isku si u soo gaadhay mooyaane.

Oregon  
**Health**  
Authority

Public Health Division  
800 NE Oregon St.  
Suite 465 B  
Portland, OR 97232

Bogga Internetka:  
[healthoregon.org/  
preparedness](http://healthoregon.org/preparedness)

971-673-1315

HSPR Pub 12-3-12  
Somali